# Xuuquuqaha iyo Masuuliyadaha Macmiilka NYFS

## *Xuquuqda Macmiilka:*

1. Macmiilka ayaa xaq u leh in loola dhaqm si ixtiraam iyo tixgelin leh si loo dhawro sirtiisa iyo sharaftiisa.
2. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu fisho in, inta karaankeed ah, ay NYFS ay jawaab macquul ah ka bixiso codsiga macmiilka ee adeegyada ayna siiso adeegyada u sahlaaya bukaannada inay helaan caafimaadka ugu sareeya.
3. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu fisho in dhakhtarku, marka laga codsado, uu siiyo xog ku aadan shaqsiyadiisa iyo awoodihiisa bixinta adeegyada caafimaadka. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu fisho in dhakhtarku uu raaco habraacyada NYFS ee bixinta adeegyada, uu waqtiga saxda ah qabto balamaha, uu awoodo inuu macmiilka ula kulmo si joogto ah, inuu ka jawaabo wicitaannada waqtiga ku haboon gudihiis uuna macmiilka dhakhtar kale marka uusan caawin karin asagu.
4. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu ka helo dhakhtarkiisa xogta muhiimka u ah inuu baxsho ogolaanshaha faahfaahsan ee daawaynta kahor intuusan bilaabin wax habraacyo ah iyo/ama daawaynta.
5. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu diido daawaynta ilaa heerka uu u fasaxaayo sharcigu, iyo in lagu wargeliyo cawaaqibyada dhimirka ama caafimaadka ee go'aankiisa. Haddii macmiilka ay maxkamadu amarto inuu daawaynta qaato, macmiilka ayaa xaq u leh inuu ogaado cawaaqibyada diidmada daawaynta.
6. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu dhakhtarka ka helo xogta buuxda ee ugu danbsaysay ee la xariirta baaritaankiisa, daawayntiisa iyo baaritaanka kahor laguna bixinaayo erayo caadiyanla filaayo in macmiilku fahmaayo.
7. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu ka qaybgalo abuurista yoolalka daawaynta, ayna ku jirto xaqa xogta dookhyada kale ee daawaynta, talooyinka dhakhtarka ee daawaynta, iyo mudada, qarashka iyo natiijada laga filaayo daawaynta iyo xaqa aqbalaada qorshaha la dejiyay.
8. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu ka madax banaanaado inay si khaldan ula dhaqmaan shaqaalaha, ayna ku jiraan xanibaadaha.
9. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu fisho in dhammaan xiriirada iyo diiwaannada la xiriira daryeelkiisa iyo daawayntiisa loo arkaayo kuwo sir ah.
10. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu arko diiwaanadiisa caafimaadka iyo dhaqaalaha. Helitaanka ayaa laga wadaa xaqa arkida diiwaannada si bilaash ah shan maalmood gudahood kadib marka aragtida uu codsado, iyo inuu helo nuqulka diiwaanka ama qaybaha diiwaanka ayadoo laga qaadaayo $.10 (toban senti) calaa bog. Helitanaka diiwaanka ayaa lagu xadidi karaa waqtiyo ay shaqaalaha NYFS joogaan si ay macmiilka uga caawiyaan akhrinta diiwaanka.
11. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu qiimeeyo uuna helo sharaxaad dalabka qarashaadka adeegyada la siiyay, iyada oo aan laga eegayn cida qarashka bixinaysa.
12. Macmiilka ayaa xaq u leh in talo laga siiyo haddii NYFS ay soo jeediso in la sameeyo ama la fuliyo cilmi baaris kasta oo aadane ama tijaabo saamaynaysa daryeelka iyo daawaynta macmiilka. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu diido ka qaybgalka cilmi baaris ama tijaabo kasta asagoo aan go'aankaani saamayn ku yeelan karin adeegyadiisa ka macmiil ahaan.
13. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu helo xuquuqda difaaca iyo adeegyada u doodista si uu fahmo, ugu dhaqmo uuna u difaacdo xuquuqdaan.
14. Macmiilka ayaa xaq u leh inaan loo gaysan takoor ku salaysan da', isir, midab, caqiido, diin, wadan, jinsi, xaalada guurka, naafo, dookh galmo, iyo xaalad la xiriirta helitaanka caawimada

dawlada. Tan waxaa ku jira ku dhaqanka Sharciga Xuquuqda Aadanaha ee Minnesota, cutubka 363 A.

15. Macmiilka ayaa xaq u leh inuu diido in laga duubo sawir, cod ama muuqaal. Kahor intaan laga duubin sawir, cod ama muuqaal macmiilka, ama wakiilkiisa ayaa ogolaansho bixinaaya.
16. Haddii wax kamid ah xuquuqdaan la xadido ogolaanshaha xirfadlaha caafimaadka dhimirka ayaa lagu qori doonaa galka macmiilka. Ogolaanshahaan waxaa ku jiraaya sababaha loo xadiday.

## *Cabashooyinka Macmiilka:*

Haddii macmiil aaminsan yahay in xuquuqdaan la jebiyay macmiilka ayaa xaq u leh inuu gudbiyo cabasho, midkood si toos ah ama qoraal ahaan, uuna u diro Agaasimaha Caafimaadka Dhimirka ee NYFS.

Macmiil ayaa sidoo kale la xiriiri kara Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha ee Minnesota, Laanta Ruqsadaha oo laga heli karo 651-431-6600; Xafiiska Dhexdhexaadiyaha Naafooyinak Caafimaadka Dhimirka iyo Kobaca oo laga heli karo 651-757-1800; Xafiiska Cabashooyinka Xarumaha Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka 651-201-4200 iyo Dhammaan gudiyada ruqsada la xiriirta caafimaadka.

## *Waajibaadka Macmiilka:*

1. Inuu si firfircoon uga qaybgalo qorshaha daawaynta ama yoolka.
2. Inuu baxsho ogeysiis 24 kahor haddii balanta uusan imaan karin.
3. Inuu dhawro xuquuqda sirta ee dadka kale ee ay u adeegaan Adeegyada Dhalinta iyo Qoyska ee Waqooyi Bari.
4. Inuu raaco dhammaan xeerarka caafimaadka iyo badqabka ee ay dejisay NYFS.

NYFS ayaa codsanaysa in isbadello kasta oo ku dhaca xanuunkaaga, baahiyahaaga daawada, xaaladaada dhaqaale, ama caqabadaha kale ee daryeelka loo sheego kooxdaada daryeelka si aan si wadajir ah xal ugu raadiso.

________________________________________ _______________________
Magaca Qoran Taariikhda

________________________________________ _______________________
Saxiixa Bukaanka ama Wakiilka Gaarka ah Xiriirka Wakiilka



**Northeast Youth and Family Services - Shoreview**
**3490 Lexington Ave. N.**
**Shoreview, MN 55126**
**Taleefanka: 651-486-3808 Fakiska: 651-486-3858**

**www.nyfs.org**

**Northeast Youth and Family Services – White Bear Lake**
**1280 North Birch Lake Boulevard**
**White Bear Lake, MN 55110**
**Taleefanka: 651-429-8544 Fakiska: 651-486-3858**